



## Warqad warbixineed –

### Shuruucda amaahda kombuyuutarka ardayga

Markii aad kombuyuutar arday u gaar ah ka amaahatid iskuulada degmada Göteborg waxaa ka masuul ah adiga ardayga ah iyo adiga waalidka ah labadiinaba. Taasi waxay ka dhigan tahay inaad ka taxaddartid kombuyuutarka oo aad raacdid shuruucda amaahda. Kombuyuutarka waxaa iska leh Göteborgs Stad mana lagu oggola inaad cid kale amaahisid, ka kiraysid, ka iibisid, ka rahamatid ama qaab kale aad ugu xadgudubtid xuquuqda lahaanshaha ee Göteborgs stad. Kombuyuutar waxaa loola jeedaa aalad digital ah oo loogu talagalay waxbarashada oo iskuulkaagu u isticmaalo oo u qaybiyo ardaydiisa, tusaale ahaan Chromebook, iPad, PC ama Mac. Iskuulka baa go'aanka iska leh inaad kombuyuutarka guriga u qaadatid wakhtiga iskuulka kaddib.

### Shuruucda isticmaalidda iyo maaraynta

#### **Sinnaanta dadka, waxa qofka u gaarka ah iyo qofka oo shaqsiyadiisa la weeraro waa mamnuuc**

Markii aad isticmaalid kombuyuutarka waa inaad xushmaysid sinnaanta dadka, aad isticmaashid luuqad dhawrsan iyo sidoo kale inaad ilaalisid waxa adiga kuu gaarka ah iyo waxa dadka kale u gaarka ah. In qofka si shaqsi ah loo weeraro lama oggola. Ma booqan kartid boogagga ay ku jiraan waxyaalo la dhibsado ama waxyaalo xadgudub ah ama in la kaydsado sawirro ama qoraallo la dhibsan karo ama xadgudub ah, haddii aydaan macalimadda isku afgaran inay waxaas waxbarashada qayb ka tahay.

### Daryeelid, xafidid iyo qaadid

Amaahda kombuyuutarka waxaa la socda masuuliyad wayn oo laga qaado daryeelidda, xafidida iyo in loo qaado qaab la isku hubo si uusan dhaawac u gaarin ama uusan u dhumin. Taasi waxay qusaysaa iskuulka gudihiiisa iyo bannaankiisa. Tusaale ahaan marna laguma oggola inaad kombuyuutarka uga tagtid meelo halis uu ugu jiro in la xado. Markii aad qaadaysid kombuyuutarka waa inaad markasta isticmaashid galka diffaaca la socda.

### Soo sheeg xattooyo iyo dhumid

Haddii kombuyuutarku kaa dhumo ama la xado waa inaad isla markiiba usoo sheegtid iskuulka. Haddii iskuulka nawaaxigiisa uu ku dhumo iskuulkaa booliska ku wargelinaya. Haddii ay ka dhacdo iskuulka meel ka baxsan adiga waalidka ah baa booliska ku wargelinaya. Kaddibna wargelinta booliska koobigeeda baa u gudbinaysa iskuulka.

### Cillad ku timid shaqaynta, cillad bixin iyo dayactir

Haddii kombuyuutarka cillad shaqayntiisa ku timaado ama dhaawac soo gaaro waa inaad isla markiiba ku wargelisid iskuulka. Shaqaalaha jooga iskuulka baa kugu caawinaya in kombuyuutarka loo diro cillad bixin. Iskuulku wuxuu xaq u leeyahay

kombuyuutarka inuu u isticmaalo inuu borogaraamyoo kusoo dejiyo, cillad bixiyo, shaqaynteeda hubiyo oo dayactiro markii loo baahdo.

### **Markii aad soo celinaysid kombuyuutarka**

Markii wakhtiga amaahda dhammaado waa inaad, haddii aan wax kale la sheegin, ku celisid iskuulka kombuyuutarka oo wata cabbeeyihiisa iyo wixii kale ee la socday asbuuc gudihiis. Kombuyuutarka iyo cabbeeyaha waa inay u shaqaynayaan sidii markii la idiin keenay, marka laga reebo duugoobid iska caadi ah ama dhaawac ay daboolayso dammaanadda (caymiska).

Haddii kharash yimaado marka lasoo celinayo, tusaale ahaan kharashka soo diridda, waa in adiga ardayga ah ama waalidku iska bixiyo. Markii aad kombuyuutarka soo celisid waxaad iskuulka ka heli doontaa rasiid.

### **Haddii aad jabisid shuruucda**

Haddii aad jabisid shuruucda wuxuu iskuulku xaq u leeyahay inuu kombuyuutarka dib u ceshado. Haddii uu jiro shaki ku saabsan inaad u isticmaalin kombuyuutarka sida shuruucdu dhigayso wuxuu iskuulku xaq u leeyahay inuu kontoroolo boogagii la galay iyo waxa kombuyuutarka ku jira. Markii kontorool noocaas ah la sameeyo kaddib waa inuu iskuulku la xiriiro ardayga iyo waalidka. Haddii kombuyuutarka ama alaabtii la socotay dhaawac soo gaaray dhayacaad adiga kaa timid darteed, ama la xado/ dhumo markii aad u xafiday qaab dayac ku jiro, waxay Göteborgs Stad dalban kartaa dhaqaale magdhow ah.

### **Muddada amaahda**

Waxaad kombuyuutarka amaahan kartaa inta

- a) Aad raacaysid shuruucda kombuyuutarka.
- b) Haddii iskuulka laga hadlayo aad dhigatid.

Waxaa sidoo kale jiri kara duruufo kale oo uusan iskuulku saamayn ku yeelan karin , oo keeni kara isbeddel ku yimaada wakhtiga amaahda.

### **Maaraynta xogta shaqsigaa**

Warbixin ku saabsan sida loo maaraynayo xogtaada shaqsigaa waxaad ka helaysaa bogga Göteborgs Stad. Ka raadi “Så behandlar grundskoleförvaltningen personuppgifter”.

### **Xaqiiji inaad shuruucda kor ku qoran akhrisay oo aqbashay**

Adiga waalidka ah waa inaad saxiixdid dokumentiga xaqiijinta. Dokumentigaas waxaan kusoo raacinay warqadda warbixineed. Markii ilmaha masuul laga wada yahay waa in adiga iyo waalidka kale aad saxiixdaan dokumentiga.

**Dokumentiga la saxiixay waa in loo soo gudbiyo iskuulka marka kombuyuutarka la amaahanayo.**